

## Enköping – Enescopinge – muddo dheer ka hor

Inta lagu jiro 2017–2018 waxaa faras magaalada Enköping ka soconaya baaritaan la xiriir degel baaris.

Enköping waa mid ka mid ah magaalooyin Swiidhan ugu qadiimisan, waxayna horbaba jirtaa 800 oo sano laga soo billaabo markii ay guryo, garaashyo iyo waddooyin suuq ku ag yiilleen.

Haraaga isagoo isugu xig-xiga sidii loo dhisay wuxuu ku yaallaa lakabyada sar-sare ee dhumuca weyn ee dhulka, halkaas oo meesha ugu hooseysa laga heli karo waxyaabaha waxa ugu duqsan, meesha ugu sarreysana waxyaabaha waxa ugu da'da yar. Waxyaabaha ka sameysan geedaha, lafaha iyo maqaarka waxaa si fiican loogu xafidayaa dhulka qoyan ee goobta.

Tobannaan degel baarayaal ah ayaa baaritaanka ka shaqeynaya. Waxay si gaar ah u daneynayaan in ay wax dheeraad ah ka ogaadaan sidi ay ahayd in Enköping la degganaado sanooyin fara badan ka hor. Xaggey dadku ka yimideen? Maxay cuni jireen? Maxay ahaayeen cudurrada qofka ku dhici jiray? Sidee nadaafadda iyo qashin guridda loo maareyn jiray?

Sharciga Swiidhan ayey ku caddahay in ay khasab tahay in marka wax cusub la dhisayo la tix geliyo waxyaabihii ay dadkii hore ka tageen. Waxaa taas loo sameynayaa si dhammaan, kuwa iminka jooga iyo jiilasha soo socda intuba, ay taariikhda wax uga ogaadaan. Baaritaanka waxaa la sameynayaa iyadoo loo adeegayo degmada Enköping.